Fu'aad Sh.
Mareegta Farshaxan

# Xuska Maalinta Mujahidiinta
## Oktoobar 17keeda

# *Maxamed Bashe X. Xasan*

Hambaaber dhowaanta
Dagaal wata heeso
Hargeysi ma toostay
Harqoodka ma tuurtay
Hadoodilan yeelin
Heshii Nebi Saalax
Hankeedu ma siiyey.
Ninkay la hadlayso
Hadday sama weydo
Nafteeda hurayso


Dareen ma hurdaana
Hidday u lahayde
Hogaanka ma diiday
Inaanay hummaaga
Sidii hebel geel ah
Horaadada dhiibin
Waxay hibanayso
Hagaag ma u sheegtay
Inay hantideeda
Hubaal ma caddaysay

Allaylehe waa hog
Malaa Hugur tiisa
Inaan hayal toosan
Maskii Hilqadaale

Shax aan la hilmaanin
Waxaabu u haystey
Harraatii aqoonne
Ma soo hardaf boodey

Hambaabir(Hadraawi)

Maansadani kor ku xusani waxay aheyd dhambaal si xaqiiqa uga af celinaya geesiyada danta ummada u sadqeeyey danahoodii gaarka ahaa , ka dib dhagaxtuurkii ay hagayeen ardeydii hamigoogu siin waayey in ka gaabsadaan sida gardarada ah kana caagan gabashada ee loola dhaqmayo hormoodkoogii (ururkii UFO) daryeelka degaanka iyo bulshada u hinqadey . Dhacdadan ka dib ardey badan ayey u cuntami wayday inay buugga uun sidaan kuna badashey qori caaradii , kol haddii bishan Oktoobar 17keeda loo suntay xuskii halyeyadii sooma jeestayaasha ahaa ee SNM , bahda mareegta farshaxan waxay idinla wadaageysaa in yar oo ku saabsan taariikh nololeedka mid ka mid ah ardeyda xiligaa gadooday .




Runtii sooyaalka taariikhdu wuxuu inala wadaagaa dad nolosha qaybaheeda kala duwan siyaalo kala duwan uga qayb qaatey, Maxamed Bashe Xaaji Xasan dadka runtii aqoonta u leh baryahan waxaa suurtogal ah inay ku tilmaami lahaayeen qoraa qalinka adeegsigiisa u ban baxey dhawr buugna si farshaxanimo leh u habeeyey soona bandhigay si uu bulsho waynta ku hadasha afka hooyo ula wadaago ,boodhkana ka duuliyo afka sii luudaya goor uu gataati dhacaba.
Hase yeeshee Maxamed waa shakhsi qoraanimada ku darsadey dhinacyo kale oo nolosha ka mid ah,balse aan iskiin baro marka hore Maxaamed Bashe Xaaji Xasan siday u badan tahay bulsho weynta Soomaliyeed wuxuu ka soo jeedaa qoys reer


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.

guuraa ah una suurto galiyey yaraantiisi inuu si xeeldheer ugu kacaamo unuga abtirsiimo ee afka hodanka ah , Maxamed Baashe X. Xasan waxa uu ku dhashay duleedka galka Maygaagle oo ku ogog leh Qorilugud, degmada Buuhoodle dayrtii, inkastoo tilmaamida gu'ga dhalasho lagu xadeyn jiray dhacdoyinka saameyn ku lahaa waqtiga hadana Maxamed Bashe waxaa lagu qiyaasaa inuu 1963[kii] ay dhalashadiisu ku beegnayd. Malcaamadda iyo waxbarashada fasalka 1aad ee dugsiga hoose waxa uu ka bilaabay Ballidhiig, Gobolka Togdheer. Dugsiyada hoose, dhexe iyo sareba, waxa uu qoraagu ku idlaystay magaalada Hargeysa (Dugsiga Hoose ee Qudhac-dheer), Dugsiga Dhexe ee Biyo- dhacay iyo Dugsiyada Sare ee Faarax Oomaar iyo Gacan Libaax)

Mucaaridkii hubaysnaa ee ku kacsanaa dawladdii keligii taliyihii Barre, garabkiisii SNM ayuu qoraagu ku biiray Maarso 1983[kii].Dhalinyarada iyo waayeelkuba aad bey uga biyo diidsanaayeen xaalada uu dalku ku sugnaa sidaa darted buu Axmed I.Diiriye “Qaasim”- Ihun- uu tilmaamayey siduu dalku ku sugnaa isagoo ku halqabsanayey caasimada Hargeysa,waxaanu yidhi:

Hargeysaay anaa kaa hurdee laguma haysteene
Haddaan soo hanbaabiri lahaa heec ma noqoteene
Horaad dacara kuma nuujiseen hooya beenihiye

Halaq iyo abees kuma gam'een hadhacyadaadiiye
Huluulaha col kuuguma jireen soo hamaansadaye
Hantidaada muu weerareen horor wax boobaaye


Hareertaada lama soo fureeen haaway doobadahe
Haweenkiyo caruurtaad lahayd lama halgaadeene
Hablahaaga muu guursadeen haybti garanwaaye

Hog dalluuna kama qayliyeen hanadadaadiiye
Hanuunshiyo indheergaratadii hode ma dhaafeene
Hadhaa laguma sheegeen raggii noo horrayn jiraye

Hargeysi way ka sii daraysey oo waxa ay ku sii durkaysey godankii gabbood falka! Bandowgii lagu soo rogey ka dib jebintii Jeelka Mandheera bishii Janaayo 1983[kii] ee SNM-tu fulisey, ayaa weli guudka ka saarrayd. Dadka iyo digaaggu isku mar ayay xeroonayeen. Bishii Maarso 25[keedii] , 1983[kii] habeen Jimce ah ayey xaqiiqo mur iyo deebaaq ka qadhaadh maggaabiyeen. Waa saaxiibadii ay dharaarihii ardaynimada wada qaateen Cabdiraxmaan Maxamed Faarax (Cabdiraxmaan Jaylaani) , Cabdi Faacuul Diiriye Laangadhe iyo Axmed Ismaaciil Xasan Mataan. Iyaga oo afartooduba wada jooga guriguu galayey Maxamed Bashe ee xaafadda Guryasamo, qaybta Xiddigta. Ayey talo la soo gudboonaatey .Gorfaynta taladaas waxa ku biyo shubatey fulinta go’aan qaadasho ku saabsanayd in ay tallaabaan ooy ku biiraan Ururka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed ee SNM. Caawadaaayey go’aansadeen inay ka gudbaan xuduudda u dhaxaysa labada Talis ee keligii taliye Barre iyo Mengiste Hailu Mariama. Arrintu may sahlaneyn iyadoo xaaladda lagu jiraana ay aheyd bandow oo habeenkii waxa socon


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.

karayey uun askari iyo nin waalan, maalintiina ishaa la isku xadayaa oo waa nin iyo xeeshii.




Gaadhigii u ballansanaa ee dhinaca galbeedka marin lahaa sidii uu qorshuhu ahaa ee Xarshin ku dhowayn lahaa, ayaa la basaasay oo geerashka lagama soo saari karayn. Basaasiddu waxa ay ku taxmaysey tuhun ku yuubnaa inankii gaadhiga soo qabanqaabinayey oo goor dambe oo xeedho iyo fandhaal kala dhaceen aay ku baraarugeen inuu ku xidhan yahay xafiiskii Dhabar Jebinta. I bixiyow iga badbaadi ayaa ka dhacday meesha . Dhinaca bariga ayay u baxsadeen. Laba caano-maal ayay Burco si dhuumasho ah ugu sugnaayeen. Bandow la mid ah tii Hargeysa, ayaa Burcona saarnayd. Lug ayey goor casar gaaban ah dhinaca Hawdka ugu baxeen. Aroori intaan la gaadhin ayaa gaadhi xadka ku dhoweeya laga daba keenay. Meel Dhagaxdheer duleedkeeda ah inta uu dhigay ayuu darawalkii farta ugu fiiqay dhanka xuduudda oo ku yidhi “waddadaa afka saara oo caawa oo dhan sii guureeya, ilaa berrito barqo kululna waxa aad ku beegan tihiin Baalidhaye oo ah halka idiinku sokaysa ee aad SNM ka gaadhi kartaan”.

Waxa ay ahayd habeen badh. Madowga habeennimo iyo cidla’ ciirsila’da colaaddu weheliso waxa kaga darnayd aqoon la’aanta ka haysatey dhulka ay sida sanqadh tirashada leh u marayeen iyo halka cagtoodu ku fiiqan tahay oo aanay waxba ka ogayn! Habuura iyo Eegi meel u dhaxaysa ayey cabbaar ku gataati dhaceen. Carcarihii kulka cadceeddii subaxnimo ayaana kiciyey. Cidhibta ayey ku dhufteen. Baallidhaye ayey hadh-soo-korkii isku daruuriyeen, iyada oo aanay dhinacna kaga jirin daal iyo qadoodigii xalayto darteed . Ragga qaarkood kabaha ayay lalansanayeen oo boqnahaa dhiiggu shalakh lahaa.

Arlada jiilaal aan sidaas u sii ba’nayn iyo colaad aan la is bixinayn ayaa ku loollamayey. Magaalooyinka dhulkaas ku yaallaa waxa ay u badnaayeen cooshado laga maato baxay oo waaqla’ ah. Fadhiisinka SNM ee ciidammo joogaan ee ugu dhowaa waxa uu ahaa Darroor oo Alle ha u naxariisto’e dagaalyahankii Maxamed Cali Faarax ku hayey ciidammo aan badnayn oo qoriley keliya ka koobnaa. Baalidhaye Xabashida iyo SNM toonna ma joogaan. Gaashaamo ayaa waxa ka jirey saldhig weyn oo ciidamada Xabashidu fadhiyeen, waxaana halkaas dugsanayey dhawr sarkaal oo SNM ah oo beryahaas qaarkood Soomaaliya ka soo goosteen sida Cali Hayaan iyo Maxamed Kaahin, qaarna SSDF-ta ka soo wareegeen sida C/laahi Cali Suufi. Wacyi gelin iyo abaabul dadka reer guuraaga ah ee jiidahaas deggan ku aaddan ayay halkaas kaga hawlanaayeen. Gaadiid waxa u ahaa gaadhi Dabagoos loo yaqaanney oo waddada laamiga dheer laga soo qabsaday beryahaas isaga oo muus uu Xamar ka keenay u sii walwaalaya dhinaca Burco.


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.

Baalidhaye markii ay isa soo taageenba waxay kula kulmeen gaadhigaas Dabagooska oo ka yimid dhanka Gaashaamo aanay la socdeen niman dharcad ah oo qorya sita oo ka tirsan SNM. Waxa watey nimankaas Alle ha u naxariisto’e Cabdillaahi Cali Suufi oo ka mid ahaa saraakiishii SNM. Waab yar hoostii isaga oo fadhiya ayaa loogu geeyey. Waxa dhinacyada ka taagnaa dhawr dhallinyaro hubaysan ah. Wuuna soo dhoweeyey, iaguna waxay u sheegeen waxa ay u socdeen oo ahaa in ay SNM ku biiraan.Su’aalaha la waydiiyey si loo hubiyo go’aankooga iyo sugida amniga darted ayaa qaarkood anfariir iyo la-yaab ku abuuray dhalintan  wada socotay ee ardayda ahayd …

Waxa ay ahayd markii ugu horraysey noloshooda ee sidaas loo wareysto,.Waannay is eegeen iyaga oo argagax ka muuqdo,afkiina  juuqda gabay. Markii uu  arkay Cabdillaahi Cali Suufi  in ay si xun u didsan yihiin ayuu sharraxaad dheer u galay oo u sheegay sababta loo hubinayo ujeedadooda iyo iyagaba inay salka ku hayso  arrin ammaanka la xidhiidha oo in sidaa loo hawlgalaa ay ku khasban yihiin.

Isla duhurnimadiiba dhinaca Gaashaamo ayaa loo gudbiyey. Mutulle ayay dhawr sarkaal iyo inammo ilaaliyaa joogeen. Cali Hayaan iyo Maxamed Kaahin baanu ka xasuustaa saraakiishaas. Gaashaamo niyaddaa laga negaa oo ma jirin dareenkii Baalidhaye ee feejignaanta lahaa. Gaashaamo waxa fadhiya ciidamo xoog leh oo Xabashiyeed oo ku leh saldhig weyn oo aan dhayal loo soo hawaysan karin.

Raacii u horreeyey ardaydii Hargeysa ka soo tallowday  dhawr cisho ayay Gaashaamo ka sii maqnaayeen oo dhanka galbeedka uga sii gudbeen, qaar kalena Xarshin, Rabaso iyo Darroor  ayay ku soo qulqulayeen. Si ay ugu qayb qaataan tababar laga furayey Baabuli oo Herer duleedkeeda ah, waa in ay dhinaca galbeedka u sii hindiwaasaan. Waxaana sii xiise geliyey in ay Itoobiya gudaha u sii muquurtaan oo saaxiibbadoodii kale ee Xarshin ay ku hubeen arkaana  una sii dhowaadaan.

Darroor waxa ciidammo aan badnayn, hase yeeshee hubka fudud ku gaashaam, ku hayey Alle ha u naxariisto’e Mujaahid Maxamed Cali Faarax. Dagaalladii qabaa’ilka ee hawdka sare ayaa lagu mashquulsanaa. Hargeysa iyo xanuunkii yaalley cidiba ma hadal hayso ama wakhti la xasuusto iyo meel lagu xasuusto toonna lama joogin. Reer Hebel iyo Reer Hebel kale, ayaa marna isku qolo ah, mar kalena is riixaya oo kala kala reero noqonaya. Darroor muddo bil gaadhaysa ayay ku negaadeen. Xiisihii ay aragtida Maxamed Cali Faarax u hayeen, ayaa ka horjoogsadey in ay hore u sii socdaan oo dhinaca Xarshimeed u sii dalandalaan. Nasiib darro lamay kulmin Maxamed Cali oo bishaas saldhigga ka maqnaa.

Cabdi Daahir oo haddeer Ingiriiska jooga, Alle ha u naxariisto’e Siciid Xasan Nuur, Daabbad oo  hadda dooc iyo dareen meel uu joogo aanan iyo u hayn wax uu ku dambeeyey, iyo Maxamed Bashe ayaa goor cawaysin ah iskula faqay in ay hiirta waaberiga sangaha halabsadaan oo Xarshin u sii gudbaan. Afartooduba waxay isku ahaayeen Ciyaala Dumbuluq oo aqoon wacan baa ka dhaxaysay. Lug aan cidi dhaaddanayn ayay Darroor kaga baxeen markii libdhadu si fiican dhulka uga soo hinqatay. Reeraha miyiga dega ayaa dal-yaan iyo gadh-wadeenba u ahaa oo marba inta ay caano  siiyaan sii tilmaamayey. Rabaso ayay Alle ha u naxariisto’e ugu tageen Shakiib Suldaan Cabdilqaadir iyo dhawr arday ah oo la jooga. Gaadhi u socda Kaam Haashin ayayna ka raaceen. Arday kolkii loo gartay ayaa cunto lagu waalay oo dhinac kasta laga


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.

dhigay. Cabdi Daahir iyo Siciid halkaas bay kaga xidhiidh furteen oo in ay Hargeysa ku laabteen ayay maalin dambe ku baraarugeen. Daabbad iyo Maxamed Bashena Xarshin bay tageen. Ardaydii ugu badnayd ayey halkaas ugu tageen. Hablo iyo inammaba way lahaayeen ardeyda halkaa ku sugnayd xiligaa.

Xarshini magaalo ahaan iyadaa ugu roonayd meelihii ay lugta ku soo jibaaxeen min Baalidhaye, Gaashaammo, Darroor, Rabaso ilaa Haashim. Iyadaana ugu Qaad badnayd, ugana busaarad badnayd. Kutaan iyo takfi dad cun ah oo aad u ba'an ayaana meesha ka heshay.

May iyo Juun 1983kii intii u dhaxaysay waxa saldhigyada SNM ku soo sunsumayey ardaydii ugu badnayd ee Hargeysa iyo Burco ka soo baxda. Maalin kasta waxa si raabe raabe ah u soo gaadhayey xayn arday ah. Saldhigyada oo dhan min bari ilaa galbeed waxa isa soo toomiyey dad gudaha ka soo tallaabay. 02/01/1983 waxa ay ciidamadu xoraynta SNM jebiyeen xabsigii Mandheera ee ugu weynaa jeelasha gobollada waqooyi oo ay ku xidhxidhnaayeen maxaabiis badan oo ku eedaysnayd in ay taliska ka horjeedeen, dadkaas oo dhammaantood SNM jeelka ka sii daysey. 12/04/1983 waxa xaruntii qaybta 26naad ee ciidamadii Xoogga Dalka ee Birjeex, Hargeysa laga soo furtay Col. Cabdillaahi Askar Barkhad oo halkaas ku xidhnaa. Labadaas dhacdo ee waaweyn waxa ka dhashay bandow, cunaqabatayn iyo cadaadis ku sii kordha dadka, waxaana kor u kacay magacii iyo jiritaankii SNM oo gudaha iyo dibaddaba saamayn ku yeeshay. Dad badan ayaa markaas dhinaca SNM iyo saldhigyadeedii Qaaxo ku soo gurmayey maalin kasta.

Baabuli oo wax yar u jirta magaalada Herer, ayaa lagu shubay ardeydii oo isku duuban iyo dhawr boqol oo "Gaas dhegoole ah".

Maxamed waxa uu ka mid noqday arday loo qaatay dhankii warfaafinta. Tababarka Baabuli oo weli socda ayaa Moaxamed bashe xanuunsadey ,taasoo dhakhtarka Herer ku yaallaa u sii xawiley mid kale oo Addis ababa ahaa. Intii uu baadhitaanka caafimaad ku jirey, ayuuna Idaacaddii mucaaridka ee Radyow Halgan barnaamiyadeedii ka qayb qaatay. Dhawr barnaamij oo laga duubay oo ayuu Maxamed kaga xog warramay wixii uu Hargeysa kaga yimid, gaar ahaan dhibaatooyinka waxbarasheed, kuwani oo dhegaha dhegaystayaasha soo jiitey, ay isagana ka muuqatay firfircooni xirfadaysan oo warbaahinta la xidhiidha. Run bay ahaydoo weliiba wuxuu jeclaa warfaafinta. Professor Cabdisalaan Yaasiin Maxamed oo markaas (Augost 1983) ahaa mas'uulkii SNM ugu sarreeyey ee xarunta Addis ababa ku sugnaa oo qaabbilsanaa Arrimaha Dibadda, ayaa Maxamed Cabdi Ismaaciil (Diktoorka) iyo Cabdi Jaamac oo Idaacadda joogey ku wareejiyey Maxamed Bashe oo yidhi "ninkan yar tababara". Cabdi Jaamac beri dambe ayuu Soomaaliya dib ugu noqday.

Augost 1983 ayuu si rasmi ah warfaafintii SNM uga mid noqday. Idaacaddu waxa ay ahayd caroog midaysan oo ka dhexeeyey Xoogaggii Mucaaridka Soomaaliyeed: SSDF iyo SNM. Waxa ay ahayd halkii keliya ee siyaasadda mucaaridku ka midaysnayd. Shaqaale isku dhaf ah oo labada jabhadood ka kala tirsan iyo laba maamul oo labada jabhadood kala metela, ayaa Radio Halgan ka wada hawl geli jirey. Dhinaca SNM


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.

Maxamed Cabdi Ismaaciil (Diktoorka) iyo Rashiid Sheekh Cabdillaahi X. Axmed (Gadhweyne), ayaa xilligaygii (1983 – 1987) u kala dambeeyey maamulka idaacadda. Mar kasta Maxamed Bashe wuxuu qaabbilsanaa barnaamijyada, gaar ahaan warka iyo isku dubba ridkiisa. Dhanka SSDF waxa idaacadda maamulkeeda la wadaagi jirey Cabdilqaadir Faarax Bootaan oo “Cali Ciijis” lagu naanaysi jirey. Dhinaca hawl-wadeennada idaacadda (SNM), waxa aan uu ka xusuustaa xilligii uu halkaa joogay Cali Mijir Qaaddi Maxamuud oo ugu wakhti dheeraa, Xasan Siciid Ileeye (Maakhuri), Cabdi Jaamac, Cali Jaamac Axmed (Guush), Ismaaciil Cumar Aadan (Boos) iyo Alle ha u naxariisto’e Axmed Cabdi Godane oo dagaalkii gudogalka ku geeriyoodey. Dhanka SSDF wuxuu ka  xusuustaa Cabdirashiid Aadan Seed (Qoor)  oo haddeerto ka mid ah la-taliyayaasha siyaasadda ee Col. Cabdillaahi Yuusuf Axmed, Xiif Cali Taar oo ka mid ah isna saraakiisha sar sare ee dawladda Impegaati, Saleebaan Daahir Af-qarshe, Maxamuud Cigaal Caymo iyo Sucaad Sheekh  Cusmaan.

Studio Oramadu lahayd oo ku yaalla duleedka fagaarihii Addis Ababa ee caanka ah ee Abyood ee lagu dabbaaldegi jirey xilligii Misgiste, ayeu subax kasta ku kallihi jireen oo barnaamijyada ku qaban jireen inta ka horraysa 12:00 duhurnimo. Nin ka socda nabad sugidda Itoobiyaanka, ayaa barnaamijkii caawa baxayey oo laba giraamood ku duuban ka qaadi jirey. Waa la sii dhegaysan jirey, deedna waxa loo gudbin jirey cod laliyaha guud oo habeenkii laga soo dayn jirey. Walow ay hoggaaminta labada jabhadood kala siyaasad ahayd, haddana khilaaf iyo is-diiddooyin badan oo barnaamijyada ku saabsani dhexdooda kama aanay abuurmi jirin wixii ka horreeyey murankii siyaasadeed ee dhinaca hoggaaminta ku taxnaa ee SSDF soo foodsaaray 1980-naadka badhtankoodii.

Wuxuu  si fiican u xusuustaa maalmihii shirqoolka lagu diley Cabdiraxmaan Caydiid Dhawdhawle iyo Iikar Xaaji Maxamed Xuseen oo labaduba ka mid aha hoggaanka sare ee SSDF oo ka dhacay Diredhabe, ayey tacsi ku saabsanayd geeridaas naxdinta lahayd ku sii daynayeen magaca golayaasha hoggaaminta iyo ururka SNM. Habeenkii ayey sidii u caadada ahayd idaacaddii fureen si ay u bilkeediyaan sida barnaamijku u baxayo iyo tayadiisa. Aayadihii Qur’aanka ahaa iyo Sheekh Cabdullaahi, ayaa si toolmoon u baahey, warkiina wuu raacay tashuush la’aan. Waxa ay ahayd in warka ka dib tacsidii oo uu Maxamed Bashe daadihinayey  baxdo, hase yeeshee barnaamijka waa laga garoocday oo tacsidaasi ma bixin! Subaxdii baa la isku qabsaday. Waxa yaab lahaa marka ay barnaamijka dhammeeyaan duubitaankiisa, waxa qaadi jirey Itoobiyaanka. Haddii wax soo baxaan oo loo baahdo in barnaamjikii la qaaday wax laga dhimo ama wax lagu daro, waa in labada qolaba arrintaas wax ka ogaataa. Tani waxa ay ahayd arrin ugub ah. Subaxdii markii la isu yimi waxa dillaacay muran dheer oo khilaaf hanaqaaday abuuray, kalsoonidii oo dhanna wiiqay. Baadhitaan ka dib waxa soo baxday in maamulkii SSDF iyo nabad sugiddii Itoobiyaan hagardaamadaas iyo khiyaanadaas shuraako ku ahaayeen!

Kala daadashadii SSDF way sii kobocday. Waxa dib u laabanayey oo Taliskii Soomaaliya isu dhiibayey jabhadiin iyo siyaasiyiin in badan mucaarid ahaa. Waxa SSDF ka go’ay laba kooxood oo hore ula midoobey SSF (Kulmis) oo la sameeyey magaca SSDF. Waa Xisbigii Shaqiila oo Cabdiraxmaan Caydiid Alle ha u naxariisto’e madax u ahaa iyo Xisbigii Daliica oo Siciid Jaamac Xuseen iyo Maxamuud Cabdi Cali Bayr rag ay ka mid ahaayeen hormuudkooda ahaa. Labada kooxoodba waxa ay siyaasadooddu u janjeedhey dhanka Bidixda ama Shuuciga. Qolyahani waxa ay ka soo guureen Itoobiya oo waxa ay xafiisyo ka furteen Cadan, Yementii Koonfureed ee xilligaas.


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.

Maxamed Bashe wuxuu aan ka mid ahaa arday jabhadaha laga soo qaaday oo Xisbi Daliica (Somali People’s Vanguard Party) deeqo waxbarasho uga soo dhirindhiriyeen waddamadii Bariga Yurub, Yemen iyo Suuriya. Jamhuuriyaddii Czecholavakia ayaan anigu jaamacad u imid 1987. Czech Republic jaamacadda ku taalla caasimadda Prague ee la magaca baxday Charles University, ayaan ka raacday aqoonta saxaafadda, waxaanan sannadkii 1992 ka qaatay Digriiga Master of Journalism and Mass Communication.

Maxamed Baashe X. Xasan waxa buuggan “Hal Aan Tebayey” uga horreeyey labada buug ee “Hal Ka Haleel” oo ka xog warramaya Sooyaalka iyo Suugaanta abwaanka Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) iyo “Guri Waa Haween” oo si mug leh uga hadlaya kartida iyo ksmada haweenka Soomaalida. Qoraagu waxa uu haddeer ku nool yahay magaalada London, waxaanu daraaseeyaa oo xiiseeyaa barashada dhaqanka, taariikhda, afka iyo suugaanta Soomaalida. Maxamed Baashe X. Xasan waxa uu hadda gacanta ku hayaa daraasayn ku saabsan Ayaamihii Noloshiisa iyo Halgankii Hubaysnaa.



Gundhiga qoraalka Maxamed wuxuu ka qayb qaatey inuu ka mid noqdo mujaahidiintii qoriga degta saarey una hayaamay dhinacaa Itoobiya markii loo baahnaa ,waxaa kaloo lagu tilmaansan karaa inuu yahay qalin ku dirir u heelan u hiilinta afkeena hooyo iyo ururinta hiddo raaca dhaqanka bulsho weynta ku hadasha Afka Soomaaliga .Bahda Mareegta farshaxan waxay u hanbalyeynaysaa isaga iyo intii la wadaagtay halgankankaa.

Xigasho:

Sawirada waxaan ka soo xiganay mareegta Redseaonline.

Sawirka uu Maxamed ardeyga markaa SNM ku biirayeyna Jamaal Cali Xuseen

Qoraalkii : Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan.


Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.